# Wakhtiga jirrada iyo badbaadad ee la kasbaday

## MAXAA WAKHTIGA JIRRADA IYO BADBAADADU?

Wakhtiga jirrada iyo badbaadada waa wakhti fasax lacag leh oo loo-shaqeeyayaashu ay tahay inay siiyaan shaqaalaha Minnesota taas oo loo isticmaali karo sababo gaar ah, oo ay ku jiraan marka uu shaqaaluhu buko, si uu u daryeelo xubin qoyska ka mid ah ama si ay u raadsadaan caawimo haddii shaqaale ama xubin qoyskooda ah ay la kulmeen xadgudubka guriga.



## YAA U QALMA?

Shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay wakhtiga jirrada iyo badbaadada haddii:

- laga filayo inuu shaqeeyo yaraan 80 saacadood loo-shaqeeye Minnesota sannadkii; iyo
- uuna ahayn qandaraasle madax-bannaan.

Shaqaalaha ku meel gaaka ah, shaqaale xilliyeedka iyo kuwa wakhtiga dhiman shaqeeya waxay xaq u leeyihiin wakhtiga jirrada badbaada. Shuruudaha wakhtiga jirada iyo badbaadadu ma khuseeyaan shaqaalaha dhismaha iyo warshadaha dhismaha kuwaas oo ay matalaan hay'ada shaqaalaha dhismaha iyo dhisida haddii shuruudahan lagaga tanaasulay heshiiska gorgortanka guud.

## IMMISA FASAX AH AYAY SHAQAALUHU KASBAN KARAAN?

Shaqaaluhu waxa uu kasbadaa hal saac oo wakhtiga jirrada badbaada ah 30kii saacadood ee kasta oo uu shaqeeyo oo waxa uu heli karaa ugu badnaan 48 saacadood sannad kasta aan ka ahayn haddii loo shaqeeyuhu uu ogolaado lacag ka badan.

## HEERKEE AYAY WAAJIB TAHAY IN LAGU KASBADO FASAXA?

Wakhtiga jirrada iyo badbaadada waa in lagu bixiyaa heer la mid ah isla qiimaha saacadii uu shaqaaluhu qaato marka uu shaqaynayo.

## MAXAA LOO ADEEGSAN KARAA FASAXA?

Shaqaaluhu waxay u isticmaali karaan wakhtiga jirrada iyo badbaadada ee ay kasbadeen sababo ay ka mid yihiin:

- jirrada maskaxda ama jirka ee shaqaalaha, daaweynta ama daryeelka ka hortaga;
- jirrada maskaxda ama jirka ee qof qoyska ah, daaweynta ama daryeelka ka hortaga;
- maqnaanshaha ay sabab u tahay xadgudubka guriga, weerarka jinsiga galmada ama dabagalka shaqaalaha ama xubin qoyskooda ah;
- xiritaanka goobta shaqada ee shaqaalaha cimilada ama xaaladda degdega ah ee dadweynaha ama xiritaanka iskuulka xubin qoyska ka mid ah ama goobta daryeelka cimilada ama xaaladda degdega ah ee dadweynaha awgeed;
- marka ay go'aamiso hay'ad caafimaad ama xirfadlaha daryeelka caafimaadku in shaqaalaha ama xubnaha qoysku ay halis ugu jiraan in ay qaadsiiyaan dadka kale cudur la kala qaado; iyo
- samaynta qabanqaabada aaska xabaasha, ka qaybgalka aaska adeegga ama xuska, ama ka xallinta arrimaha dhaqaalaha ama sharciga ee soo baxa geerida xubin qoyska kamid ah kadib.

## WAA KUWEE XUBNAHA QOYSKA EE KU JIRA?

Shaqaaluhu waxay u isticmaali karaan xubnaha qoyskooda ee soo socda wakhti jirrada iyo badbaadada ee ay kasbadeen:

1. ilmahooda, oo ay ku jiraan ilmo ay korsadeen, ilmo qaangaar ah, qaybta sharciga ah, ilmaha uu shaqaaluhu u yahay masuulka sharciga ah ama ilmaha uu shaqaaluhu u taagan yahay ama u taagnaa in uu u yahay waalid (meeshii waalidka ugu jiro);
2. xaaskooda ama lammaanahooda qoyska ee diiwaangashan;
3. walaalkood, walaalaha uu dhalay sayga hooyadood/ xaaska aabahood ama walaalaha la korsaday;
4. waalidkooda dhiiga ah, korsaday ama korsashada ku meelgaarka ahaday, waalidkaa adeerka/aayada ah ama qof u taagnaa waalid ahaan (halkii waalid) markii shaqaaluhu ahaa ilmo yar;
5. ilmo ay awoowe/ayeeyo u yihiin, ilmo la korsaday oo ay ay awoowe/ayeeyo u yihiin ama ay adeer awoowe/ayeeyo u yihiin;
6. ilmo ay awoowe/ayeeyo u yihiin ama ay adeer awoowe/ayeeyo u yihiin;
7. ilmo uu dhalay walaalka shaqaaluhu;
8. walaalka waalidka shaqaalaha;
9. qof ad soddog/soddoh u tahay ama dumaashidaa/ dumaashigaa;
10. mid ka mid ah xubnaha qoyska ee ku taxan 1 ilaa 9 ee sare ee xaaska/sayga shaqaalaha ama lammaanaha qoyska ah ee diiwaangashan;
11. shakhsi kasta oo kale oo xiriir ula leh dhiig ahaan ama xiriir dhow la leh shaqaaluhu ayaa u dhigma xiriirka qoyska; iyo
12. ilaa hal shakhsi sannadkii oo uu magacaabay shaqaaluhu.

— wax intaas ka badan —

# Wakhtiga jirrada iyo badbaadad ee la kasbaday

## YAA AAN U QALMIN ESST?

ESST ma khusayso shaqaalaha soo socda:

- Shaqaalaha dawladda federaalka.
- Qandaraasle madax-bannaan.
- Dab-demiska iskaa wax u qabso ku shaqeeya iyo markii loo baahdo wictaanka diyaar u ah.
- Shaqaale ambalaasta la socda ee iskaa wax u qabso ah iyo shaqaalaha adeega ambalaasta.
- Saraakiisha la soo doortay ama dadka loo magacaabay inay buuxiyaan boos bannaan oo xafiis lasoo doorto ah.
- Shakhsi uu shaqaaleysiiyay beeralay, beerta qoyska, ama shirkadda beerta qoyska si ay u qabtaan shaqo xoogsi ama maamulka beerta ah, haddii loo shaqaaleysiiyo inay shaqeeyaan 28 maalmood ama wax kayar sannad kasta.
- Shaqaalaha dhismaha iyo warshadaha dhismaha kuwaas oo ay matalaan hay'ada shaqaalaha dhismaha iyo dhisida haddii shuruudahan lagaga tanaasulay heshiiska gorgortanka guud.
- Qaar ka mid ah daryeelayaasha qoyska ee ka tanaasulay xuquuqdooda ay u leeyihiin ESST.

## WAA MAXAY MASUULIYADAHA KALE EE WAKHTIGA JIRRADA IYO BADBAADADA AH EE AY LEEYIHIIN LOO SHAQEEYEYAASHU?

Marka lagu daro siinta shaqaalahooda hal saac oo fasax mushahar ah 30kii saacadood ee kasta oo la shaqeeyay, ilaa ugu yaraan 48 saacadood sannadkii, loo-shaqeeyayaasha waxaa looga baahan yahay in ay:

- dhamaadka wakhti kasta oo lacag bixin ah, inay siiyaan shaqaale kasta wadarta saacadaha jirrada iyo badbaadada ee la kasbaday ee diyaar u ah in la isticmaalo; iyo sidoo kale wadarta saacadaha jirrada iyo badbaadada ee la isticmaalay wakhtigaas lacag bixinta;
- in ay siiyaan shaqaalaha ogeysiin ugu dambayn Jan. 1, 2024 — ama bilawga shaqaalaynta, hadba kii dambeeya — Ingiriisi iyo luqadda aasaasiga ah ee shaqaalaha haddii taasi aanay ahayn Ingiriisi, oo la socodsiinaysa waxa ku saabsan wakhtiga jirrada iyo badbaadada ee ay kasbadeen; iyo
- in ay ku daraan ogaysiiska wakhtiga jirrada iyo badbaadada buug-gacmeedka shaqaalaha, haddii loo shaqeeyuhu haysto buug-gacmeedka shaqaalaha.

Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota waxay diyaarisay ogeysiis Dhaqaale loo midaysan oo loo shaqeeyayaashu isticmaali karaan waxayna ka dhigtay mid lagu heli karo Ingiriisi iyo luqado dheeraad ah oo lagaga hadlo Minnesota.



**Wakhtiga jirrada**
Xaaladaha caafimaadka jireed ama maskaxeed, jirro ama dhaawac



**Wakhtiga badbaadada**
Si wax looga qabto xadgudubka guriga, weerarka jinsiga galmada ama dabagalka

DEPARTMENT OF LABOR AND INDUSTRY
Labor Standards • 443 Lafayette Road N. • St. Paul, MN 55155
651-284-5075 • 800-342-5354 • dli.mn.gov • esst.dli@state.mn.us

Ogeysiis: Tani waa soo koobid kooban oo sharciga Minnesota ah. Waxaa loogu talagalay in ay ahaato hage ahaan mana aha in loo tixgeliyo in ay beddesho Xeerarka Minnesota ee ku saabsan fasaxa jirada iyo badbaadada ee la kasbaday.

Nooca 062024